



Waxka Qabashada Dhibaatooyinka Araga iyo Maqalka ee Caruurta Yar-yar iyo Socod Baradka:

A Three-Pronged Approach (Nidaamka Saddex Geesoodka) ee Gobolka Washington

Hordhaca Early Support for Infants and Toddlers (ESIT) Barnaamijka (Caawimada Hore ee Caruurta Yar-yar iyo Socod Baradka)

Iyadoo la isticmaalaayo nidaamka si cilmiyeysan loo aqoonsaday, Washington Sensory Disabilities Services (Adeegyada Naafada Dareemayaasha ee Washington, WSDS) waxay diyaariyeen Three-Pronged Approach (Nidaamka Saddex Geesoodka ah, TPA) oo qalab lagu qoraayo dhibaatooyinka waalidka, hab-dhaqanada la arki karo ee caruurta yar-yar, iyo xirfadaha horumarinta ee la xidhiidha maqalka iyo araga.



Ujeedada qalabkani waa saddex dhinac:

1. In kor loo qaado fahamka adeeg-bixiyaasha ESIT ee qodobada khatarta ah ee saameyn kara arag iyo/ama maqalka cunuga.
2. In la bixiyo cadeyn in maqalka iyo araga cunuga wax laga qabtay, ama "baadhay."

3. Si loo go'aamiyo marka maqalka iyo/ama araga cunugu cadeeyo qiimeyn baadhis dheeriya.

Hadafka muhiimka ah waa in loo aqoonsado dhibaatooyinka maqalka iyo araga sida ugu dkahsaha badan si loo yareeyo saameyntooda korniinka cunuga.

Three-Pronged Approach (Nidaamka Saddex Geesoodka ah) looguma talogalin in lagu badelo ujeedada wadooyinka baadhista. Si saxda ah, waxa lala isticmaali karaa qalabka codka maqalka (OAE) baadhista maqalka, sawirida araga, iyo/ama qiimeynta baadhista dhakhtar dareemayaasha, araga, ama indhaha. Inta badan, haseyeeshee, TPA waa habka kaliya ee u diyaara adeeg-bixiyayaasha ESIT si ay u baadhaan meelaha dareemayaasha uguna qoraan, hal meel, macluumaadka khuseeya maqalka iyo araga.

ESIT waxau u baahan tahay macluumaadka hada ee khuseeya maqalka iyo araga in lagu daro Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeega Qoyska ee Gaarka, IFSP) ee cunug kasta. TPA waxa si gaara loogu talagalay ESIT waana in loo isticmaalo in lagu qabto macluumaadka ka qeybta ah nidaamka qaadashada qoyska iyo sanadle kadib intaasi, iyadoo natiijada lagu qoraayo IFSP.

Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dokumentigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xirii DCYF Constituent Relations (Xiriirka Deegaanka ee DCYF) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION FS_0069 SM (11-2021) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES